

Si wadajir ah waxaan innagu ka dhigeynaa Sundsvall mid ammaan ah

Waa xuquuqda bani'aadamka in ay dareemaan ammaan dhammaan iyadoon loo eegin qofka uu yahay iyo meesha uu joogo.

Sidaa darteed, waxaan samayneynaa annagu wax yaabo taxane ah oo kala duwan si loo kordhiyo ammaanka degmadeena. Annagu waxaan degmada u kala qaybinay 14 waaxood, halkaas waax kasta waxay yeelanaysaa koox u gaar ah ammaanka. Kooxahaas waxaa ku jira booliska, shaqaalaha xarumaha madadaalada, maamulayaasha iskuulada, milkiilayaasha guryaha, ganacsatada iyo ururada.

Kooxahaas ammaanka shaqadoodu waxay noqoneysaa wax walba oo la taaban karo si ay u sameeyaan talooyin isbeddel oo deegaanka ah, inay joogaan qaybo kala duwan ee degmada iyo in ay la kulmaan lana xaajoodaan dadka.

Wada shaqayn deris, goobo kulan oo shidan/nool iyo dhisaya xiriir waa qeybo hubaal ah. Kooxahaas ammaanku waxay kaloo sameynayaan soc-socosho nabadgaliyo oo joogto ah si ay daraasad ugu sameeyaan ammaanka waaxohooda.

Fikradda ah "Sundsvall Nabad qabta" waa in laga wada shaqeeyo oo ay xiiseyni jirto si loo helo in dad badan ay dareemaan ka qeyb qaadasho.

Asal ahaan waxa ku saabsan taahay in lagu lug yeesho bani'aadamka nolol maalmeedkooda. Oo kaliya si la isu barto oo la isu fahmo si yar oo ka sii fiican waxay keeneysaa farqi wayn.

Degmo nabad qabta

Ma haysaa adigu wax aad ka fikireyso iyo fikrado ku saabsan ammaanka meesha aad degan tahay? Mise ma rabtaa adigu in aad wax badan ka ogaato waxa ku saabsan sida aanu annagu si firfircoon uga shaqeyno arrimaha ku aadan ammaanka?

Dhinaca sundsvall.se/tryggasundsvall waxaad ka helaysaa adigu wixii macluumaad dheeraad ah. Halkaas waxaad sidoo kale jira cinwaanada e-mailda iyo lambarrada telefoonada qofka aad la xiriiri lahayd xaafada aad degan tahay.

Dhinaca Facebooga ee kooxda **Trygga Sundsvall** waxaad ka heli kartaa macluumaadka taagan.